

Xariga iyo Dib u celinta Socdaalka iyo Qaxootiga ee Koonfur Afrika

Booqo Boggaan si aad u hesho xog badan oo kusaabsan Mawduucaan
www.genderjustice.org.za/explainers

Waa maxay habka dib u celinta ama Musaafrinta ee koonfur Afrika

Waxaan si adag kuugu soo jeedinaynaa. Haddii lagu xiro inaad hesho caawimaad sharci yaqaan si gaara waxay muhiim u tahay marka lagu horkeeno maxakamadda 48 saac dood kadib xirnaanshahaaga. eeg su'aasha sideedaad ee ku qoran overleaf ka.

Haddii aad heysato cabasho mangangelyo (ay jirto khatar cadaadid ama dhibaato haddii dib lagoogu celiyo waddankaagii) Laguma musaafrin karo ama laguma tarxiili karo. hel caawimaad sharci yaqaan si degdeg ah.



Tallaabada 1

Kaliya Sarkaal Boolis ah ama Sarkaal Socdaalka ah ayaa ku weydiin kara si aad isu cadeeyso qofka aad tahay. Haddii ay heestaan sababo macquul ah oo muujinaysa inaad sifo sharci ah ku joogin Koonfur Afrika. Wey ku wareysan karaan kuna xiri karaan muddo dhan 48 saac dood ah inta ay kasoo xaqiijinayaan qofka aad tahay ama xaaladaada ee Koonfur Afrika. Hel caawimaad Sharciyeed.



Tallaabada 3

Waxaa qasab ah in lagu soo hor istaajiyo maxakamadda. waana in ay sidaan dhacdaa 48 saac kadib marka lagu xiray. Maxakamadda ayaa go'aan kagaaraysa inaad sii xirnaato iyo in kale. Go'aankooda waa in i qoraal ah lagu siiyaa. waxay kordhin karnaan waqtiga xirnaanshahaaga ilaa 30 maalmood.



Tallaabada 5

Haddii ay tarxiiladaad horay loosii wadayo, waxaa lagayaabaa in lagu gudbiyo xarunta Lindela Repatriation Centre ee kutaalla Gobolka Gauteng. Dhab ahaantii tani waxay qaadan kartaa waqti dheer in lagu sii haayo Police station ama Xabsi inta aad sugayo inta lagaa gudbinayo am si toosa lagu tarxiilayo. siday doontaba ha ahaatee waxaad leedahay xuquuqo badan inta aad xirantahay (fiiri overleaf ka) Xaaladda Lindela iyo xarumaha kale ee la isku xiraaba ma wanaagsana.



Tallaabada 7

Inta aan lagu tarxiilin kahor waa in lagu wargeliyaa tarxiilkaaga. waxaa lagu tarxiili karaa Bas, Tareen, ama Diyaarad. marka lagu tarxiilo waxaa lagaa mamnuuci doonaa inaad koonfur Afrika dib ugu oo noqoto muddo shan sano ah. Xitaa xilligaas kadib waxaa lagayaabaa inay saameyn xun ku yeelato in dal kugal aad ka hesho Koonfur Afrika.



Tallaabada 2

Kaliya Sarkaalka Socdaalka ayaa cadeyn kara inaad tahay qof ajnabi ah oo sharci darra ah. Intaa kadib waxaa billaabmaysa qaabka tarxiilka. waa in lagu wargeliyaa arintan qaab qoraal ah kuna qoran luqad aad fahmayso. sido kale waa in lagu sheegaa inaad xaq u leedahay inaad racfaan qaadato go'aankaa. Sarkaalka socdaalka wuu kuu xiri karaa si lagu tarxiilo, waxyna ku xirantahay go'aankooda.



Tallaabada 4

30 ka maalmood ee ugu horeysa kadib, Sarkaalka Socdaalka wuxu maxkadda ka codsan karaa in xirnaanshahaaga lagu kordhiyo 30 maalmood markiiba. waana inaad maxkamadda kasoo muuqataa. oo aadna sameyn kartaa qoraalo matalaad. Xabsi kordhinta waxaa lasameyn karaa kaliya marka ay jiraan sababo macquul ah oo qeexaya taas. kaliya waxaad xirnaan kartaa 120 beri si guud.



Tallaabada 6

Inta lagu gudo jiro arintan, Waaxda Arimaha Gudaha waxay xiriir lasameenaysaa Qunsulka amd Safaaraddaada amd Saraakiha Laanta Socdaalka ee waddankaaga. Si loo diyaariyo Dib u noqoshadaada. Waa inay Hubiyaan in lagu qaabilaa marka aad noqoto.

Xilli kasta inta lagu gudo jiro qaabka tarxiilintaada waxaad qorsheyn kartaa si iskaa ah inaad oga baxdo Koonfur Afrika. Haddii aad cadeyn karto inaad dhaqaale ahaan aad awoodo heesatana dokominti aad ku safri siinayaa foom lagaaga dalbanayo inaad wargeliso Waaxda Arimaha Gudaha si joogto ah. haddii aad awoodo inaad diyaarsato kaligaa inaad iskaga baxdo Koonfur Afrika si aadaan kuugu soo jeedinaynaa inaad sameyso taas haddii aysan wax dhiba kaaso gaareen inaad sameyso sidatan.

Xasuunow Haddi aan lagu tarxiilin muddo 120 beri ah gudahood waxaad xaq u leedahay in lagusii daayo. Fiiri Overleaf ka Ururada aad laxiriiri karto.

1. Goorma ayaa qofka la tarxiili karaa sababa laxiriira shacigiisa awgiis.

Koonfur Afrika Kaliya Saraakiisha booliska iyo kuwa socdaalka ayaa ogolaansho u heysta inay kuweydiyaan aqoonsigaaga. waana inay ahaataa cadeyn aqoonsi oo ay ku qoranyihiin magacaaga oyo sawirkaagaba. Kaliya waxaa lagu xiri karaa haddii sarkaal boolis ah ama Sarkaal Socdaal ah ay rumeystaan sababa macquulana arkaan inaad tahay qof si sharci darra ah kujooga koonfur Afrika.



2. Haddii aan ahay qof aan Koonfur Afrikaan ahayn waa maxay sharciyada la iiga baahnayhay inaan qaato?

Haddii ay dalkujoog kuusaaranyahay Baasaboorkaaga ugu yaraan waa inaad sidataa ma qaadataa nuqul baasaboorkaaga ah iyo fiisahaaga oo lacadeeyey markasta. Sidoo kale waa inaad qaadataa nuqul sharcigaaga qaxootiga ah oo cadeysan markasta. Haddii aad leedahay sharci magangelyo oo kameel gaar ah waa inaad markasta wadataa orijinaalkiisa.

3. Xagee la igu xiri karaa marka la i tarxiilayo?

Kaliya waxaa lagu xiri karaa meel uu asteeyey Agaasimaha guud ee Waaxda Arimaha Gudaha (waxaana lagu daabay faafinada ay soo saarto Dawaladda). Waxaana kamida qeybo kamid ah Saldhigyada Booliska, Xarumaha la isku xiro, iyo Xafiisyada maamulkoodu hoos yimaado Waaxda Arimaha Gudaha ama ay maamulaan wakiiladooda. Kuwaasi waa xarumo kusigitaan tarxiil, sida caadiga ah waxaa lagu wareejiyaa Lindela Repatriation Centre ee Ku taalla Gobolka Gauteng, waana Xarunta tarxiil ee kaliya Kutaal Koonfur Afrika.



4. Waamaxay Xuquuqda aan leeyahay inta aan Xiranahay?

Xuquuqdaada Xirnaansho waxaa kamida: (1) In lagu sheego sababaha aad u xirantahay, iyo Xuquuqda aad leedahay inta aad xirantahay; (2) In lagu xiro shuruudaha ugu yar ee heer waafaqsan Ilaalinta Sharaftaada iyo Xuquuqda Bani aadamka, kuwaas oo ay kamid yihiin, Deegaan Haboon, Cunto, Waxtaabo aad akhrisato, Iyo daweyn caafimaad; (3) Inaad awood u hesho inaad doorato ama latahato sharci yaqaane adiga dookhaaga ah, ama ay Dawladdu mid kuu qabato ay iyadu kharashkiisa bixiso; (4) In ay kusoo booqan karaan xaaskaaga qofka kuugu dhaw, iyo inaad doorato shiikhaaga diintaada kaala taliya iyo dhakhtarkaagaba; (5) In meel lagu haayo meel kabaxsan dadka dambiyada u xiran

5. Sideebaan ku heli karaa caawimaad sharci yaqaan inta aan xiranahay?

Haddi lagu qabto ama lagu kaxeeyo saldhig ujeedkuna yahay xarigaaga, waxaan si adag kuugu soo jeedinaynaa inaad hesho caawimaad sharciyesan, waxaad xaq uleedahay inta aad xirantahay inay kusoo booqankaraan xaaskaaga qofka kuu xiga dadka, iyo inaad doorato shiikh diintaada kaalataliya, ama kuu hela caawimaad sharciyeed. Haddi aadan awoodin Qareen, waxaad la xiriiri karta Hey adha si iskood ah wax u caawiya ee hoos ku taxan. (Ogsoonow haddi lagu xiro dambi wax lug kuleh, waxaad codsanrtaa caawimaad sharci.



6. Yaan la tarxiili Karin?

Kuwa heysta sharciga magan gelyo doonka ah iyo kan qaxootigaba looma xiri karo sabab laxiriirta tarxiilid, wax hoosiyamaada sharciga socdaalka. tanina waxay ka dhigantahay dib u cusboonaysiin (taas ah Tiirka inaysan Dawladi dib ugu celin karin dadka meel ay kala kulmayaan khatar ama dhimasho sabab muuqata ah oo cad). waxaa kamida dadka doonaya inay helaan magan gelyo. siday doontaba ha ahaatee dadaka magangelyo raadis ah haddii lasiiyo diidmo kama dambeys ah waxay halis ugu jiraan in latarxiilo. caruurta in la tarxiilo lama ogola, haddii aysan aheyn qiyaastii xalka ugu dambeeya. tanina waxay hor udhac u tahay ilaalinta caruurta

7. Maxay tahay qaabka Tarxiilinta sida dhabta ah?

Waaxda arimaha Gudaha waxay tarxiishaa Kumanaan qof sanadkiiba. Inkato ay jirto ilaalin sharciyeed, qeybo badan oo kamida dadka lagu xiro Lindela waxay wajahaan caqabado aad u fara badan, waxaa la ogaaday dadka laxiro in lagu haayo xabsiga in kabadan 120 beri, xaaladda meelaha lagu xirana ay aad u liidato, waxaana kamid ah inay yartahay qofku inuu caafimaad helo, ama talin dhanka sharciga ah, iyo si harci darra ah loo xiro magangelyo raadiska iyo caruurta.



8. Caawimaad baan u baahanahay yaan laxiriiri karaa?



WWW.SCALABRINI.ORG.ZA



WWW.GENDERJUSTICE.ORG.ZA

Lawyers for Human Rights | Musina: 015 534 2203
Durban: 031 301 0531 | Pretoria: 012 320 2943
Johannesburg: 011 3391960
Refugee Rights UCT | 021 650 5581
The Scalabrini Centre of Cape Town | 021 465 6433